



Caafimaadka Maskaxda iyo Agabka Lagu Taageero Qoysaska ay Ardaydoodu Isticmaalaan Maandooriyaasha

Maayo 28, 2021

Bulshada Qaaliga ee PPS,

Iyada oo todobaadkani yahay todobaadkii ugu dambeeyey bisha Wacyigalinta Caafimaadka Maskaxda, waxaan rabnaa inaan idiin in qof waliba hayo macluumaad ku saabsan sii wadista daryeelka ardaydeena waajahaya caqabadaha caafimaadka maskaxda iyo isticmaalka maandooriyaha. Waxaan sidoo kale rabnaa inaan muujino addeegyadeena BIPOC ee ardayda iyo qoysasku la siinayo.

Himilada Dugsiyada Dadweynaha Portland ee Ka Soo Kabashada Waxbarashada iyo barnaamijka Waxqabadka Nolol Caafimaad Fiican Leh ([REAHL](#)) ee awood siinta ardayda wajahaya balwada iyo caqabadaha caafimaadka maskaxda sidii ay u sii wadan lahaayeen waxbarashadooda, koritaankooda qofeed, horumarinta iyo guushooda nololeed. Dadaalada REAHL waxa ay ka kooban yihiin afar waxood oo kala ah: Ka hortaga, Wax ka qabashada waqtiga hore, Daaweynta iyo Taageerada Ka Soo Kabashada.

Todobaadka Soo Socda: [Aqoon Isweydaarsiga Ka Hortaga Naf Goynta](#) : Juune 2 waxaa loo qabanayaa dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 12-18 sanadood, iyada oo diirada lagu saarayo ka hortaga naf goynta iyo wax ka qabashada waqtiga hore oo ay horseed ka yihiin dhallinyaradu Maadaama ay dhallinyaradu ay bilaabayaan xilliga xaggaaga, waa inaynu hubinaa inay helaan xirfado isku xidhaya dhallinyarada sidii ay isku taageeri lahaayeen

Agabyada la helayo waqtiga lagu jiro xilliga xaggaaga:

- [Guuleysiga iyo Jawi Dareen Caadiya](#): Goob loogu talagalay ardayda madowga ah, kuwa midabkoodu yahay buniga, iyo ardayda asalka wadanka ah ee POC(da'doodu u dhaxayso 8 ilaa 18 sanno) meel ay ku bogsadaan, ku kulmaan, iyo ay ku muujiyaan kalgacalka qofba qofka kale u qabo. Xilliga Xaggaaga oo dhan waa la helayaa:
- [App-ka Agabka Dhallinyarada](#)
- [Maraykan Asalka ah/Fasalka Waalidnimada ay ku Baranayaan Dadka Asalka Iyada Laga Baranayo NARA](#)
- [Lines for Life Racial Equity Support Line](#) (Khadka Taageerada Sinaanta Nololsha Jinsiga) waa addeeg hay horseed ka yihiin dad shaqaale ah oo la soo noolaa waayo-aragnimo cunsurinimo
- [Shabakada Taageerada Qoyska PPS](#) waxa ay leedahay agabyo dheeraad ah iyada oo macluumaadka xilliga xaggaaga laagu kordhin doona marba wixii cusub todobaadadda soo socda.

- [Istaraatijiyada Ka Hortaga iyo Go'aan Qaadasho Caafimaad Qabta](#)

Waxaa la heli karaa agabyo diyaara sanad-dugsiyeedka oo dhan:

- [Fiidiyowga Hordhaca ah ee Xirfadlayaasha La Taliyaasha Daroogada iyo Khamradaideo](#)
- [Taageerada Xirfadlayaasha La Taliyaasha Daroogada iyo Khamrada](#)
- [Agabyada Fayo-qabka Maskaxda](#)

Qof waliba si ayuu u dhib qabaa. Kaligaa ma dhibaataadu kuma haysato. Waxaanu daneyneynaa fayo-qabka caafimaadkaaga. Waxaa jira dad iyo ururada bulshada kuu diyaar ah adiga iyo qoyskaaga sidii aad u heli lahayd xilliga xaggaaga. La Taliyaha iskuulkaaga, shaqaalaha bulshada ee iskuulka, ama xirfadlaha cilmi nafsiga iskuulka sidoo kale ayaa kaa caawin kara sidii kuugu xiri lahaa addeegyada taageerada fayo-qabka ee iskuulka ama bulshada.